

## **Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyada lamba. 13 ee 25 Janaayo 1968**

### **Wax ka bedel Xeerka Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha**

#### **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la arkay qod. 85 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay qodobka 6 ee Dekreeto-sharci lamba. 5 ee 16 Agoosto 1966 oo lagu bedelay Sharciga lamba. 19 ee 10 Disember 1966 oo la xiriira kontroolka Wakaaladaha;

Kadib markii la arkay qod. 35 ee Xeerka Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha ee Somaliya oo lagu ansixiyey xeerka lamba. 197 ee 14 Agoosto 1962;

Kadib markii la arkay qod. 2 ee xeerka lamba. 8 ee 27 Maarso 1962 oo lagu beddeley Sharciga lamba. 8 ee sharciga 26 Maay 1962 oo kusaabsan Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha;

Kadib markii la garawsaday in la bedelo wax ka bedelida faqradda 1 ee qod 20 ee Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha oo u oggoladay magacaabista Wakaalada;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Wasiirka Caafimaadka oo ay la jirto Wasiirka Maaliyadda;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka.

#### **WAXAA LA SOO SAARAY**

##### **Qod. 1**

Faqradda 1 ee qodobka 20 ee Sharciga Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha ee Somaliya oo lagu ansixiyey xeerka lamba. 197 ee 14 Agoosto 1962 waxaa lagu beddelay sida hoos ku qoran:

“Guddiga gar-qaadista waxaa hoggamin doonaa Sarkaal ka tirsan Waaxda Shaqada oo uu soo diray Wasiirka Caafimaadka iyo Shaqada, wuxuuna ka kooban yahaya wakiilka shaqaalaha iyo wakiil ka socda loo-shaqeeyeyashao ay soo dirsadeen hey’adaha shaqaalaha oo qaranah”.

##### **Qod. 2**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25 Janaayo 1968.

**Abdirashiid Ali Shermarke**

Rai’sul Wasaaraha

**Mohamed Haji Ibrahim Egal**

Wasiirka Caafimaadka iyo Shaqada

**Ali Mohamed Ossoble “Wardhigley”**

Wasiirka Maaliyadda

**Haji Farah Omar**